Royal College of Anaesthetists

Suuxdinta oo la faahfaahiyey

Warqaddaan waxay sharaxeysaa waxa suuxdintu tahay, qaabka ay u shaqeyso iyo marka loo baahan karo. Waxay kaloo sharraxeysaa faa'iidooyinka iyo halisaha suuxdinta iyo sida aad u dareemi doontid.

Muhiim ahaan, waxay kuu sheegeysaa waxa aad u baahantahay si aad u qorsheysato daryeelkaaga kadib marka lagu suuxiyo.

Waxaa qoraalkeeda ka qeyb qaatay bukaanno, wakiilladaada bukaannada iyo dhakhaatiir suuxiyeyaal ah oo isla shaqeynaya.

Suuxdintu waa marka dawooyin la siiyo si ay kaaga caawiyaan inaad dareentid nasasho badan inta lagu jiro hawsha qalliinka. Daawoyinka suuxdinta had iyo goor waxaa laga qaataa xididka, balse mararka qaar waxaa laga qaadan karaa afka ama qalab afka lagu xirto.

Suuxiye waa magac la siiyey xirfadle caafimaad oo shaqadaas qabto. Marka la joogo qolka qaliinka, suuxiyaha had iyo goor waa suuxiye. Meelaha kale ee isbitaalka ama goobaha caafimaad ee ka baxsan isbitaalka, kani waxa uu noqon karaa dhakhtar ama xirfadle daryeel caafimaad oo tababbaran.

Waxaa jira saddex heer ee suuxdinta xididka. Waxaa la yiraahdaa 'mid yar','mid dhexe',(mararka qaar la yiraahdo maan-dejin) iyo suuxdin 'meel dheer' ah. Si kastaba ha ahaatee, heerarku maaha kuwo sax ah waxayna ku xiran yihiin sida uu bukaanku ugu nugul yahay daawada la isticmaalo.

Waa maxay farqiga u dhexeeya suuxdinta dejinta ah iyo suuxdinta guud?

Farqiga ugu weyn ee u dhexeeya suuxdinta dejinta ah iyo suuxdinta guud waa:

- Heerka soojeedkaaga
- In loo baahan yahay qalab si neefsashadaada loo caawiyo
- Waxyeelooyinka ka imaan kara.

Suuxdinta ugu yar iyo midda dhexdhexaadka ah, waxaad dareemeysaa raaxo, hurdo iyo dabacsanaan Waxaa laga yaabaa inaad hurudo mararka qaarkood, laakiin way fududahay inaad toosto.

Suuxdinta guud waxey joojinaysaa guud ahaanba miyirqabkaaga inta dawaynta la wado.

Suuxdinta meel dheer ah waxay u dhexeysaa labadaan lasoo sheegay.

Suuxdinta ugu yar (anxiolysis)	Suuxdin dhexdhexaad ah (suuxdin miyir qabta)	suuxdin qoto dheer
Waxaad qaadan doontaa **qadar yar** oo ah dawo dejineed	Waxaad qaadanRr doontaa wax yar oo dejin ah	Waxaad yeelan doontaa qiyaas sare oo ah hal ama ka badan oo dawooyinka dejiyaha ah
Waxaad dareemi doontaa nasasho iyo welwel la'aan waxa ka dhacaya agagaarkaaga	Waxaad dareemi doontaa nasasho iyo hurdo badan	Waad seexan doontaa inta lagu jiro daawayntaada inteeda badan
Waad soo jeedi doontaa oo waxaad awoodi doontaa inaad si caadi ah u hadasho	Waxaad noqon doontaa qof hurdeysan laakiin si caadi ah ayaad u hadli kartaa oo waxaad raaci kartaa tilmaamo fudud haddii lagu weydiiyo	Waad seexan doontaa oo uma badna inaad hadasho inta badan daaweyntaada
Waxay u badan tahay in aad xasuusato daawayntaada, laakiin ma wada xasuusan doontid wax walba si faahfaahsan.	Waxaa laga yaabaa in aad xasuusato qaar kamid ah dawayntaada.	Uma badna inaad xasuusato wax badan oo ka mid ah daawayntaada - heerka suuxdinta ayaa la hagaajin doonaa haddii loo baahdo
Suuxdinta khafiifka ah ma saameyneyso neefsashadaada.	Suuxdinta dhexe ma saameyneyso neefsashadaada.	Neefsashadaada ayaa laga yaabaa inay hoos u dhigto. Dhakhtarkaaga suuxdinta ayaa kormeeri doona oo ku caawin doona haddii loo baahdo. Ingiriiska marka la joogo, Suuxdinta meel dheer waa in uu sameeyaa shaqaale leh tababar iyo xirfad heer suuxiyenimo.

waa maxay suuxinta laga qaato afka?

Tani waxaa loo isticmaalaa in lagu dejiyo bukaannada aad u baqa inta aan la sameynin suuxdinta guud, laakiin badanaa kuma filna in ay dhaqdhaqaaqa kaa joojiso inta lagu guda jiro qaliinka ayada keligeed. Waxa ay qaadanaysaa wakhti in ay shaqeeyso, qiyaastuna way ku kala duwanaan doontaa dadka dhexdooda.

Waa inaadan ka codsan GP-gaaga inuu kuu qoro dawooyinka afka laga qaato si aad u qaadato ka hor intaadan imaanin isbitaalka, ilaa aad heshiis ka heshid kooxda ku ilaalin doonta, haddii kale waxaa laga yaabaa inaysan suurtagal noqon in daawayntaadu sii socoto.

Waa muhiim inaad si cad uga fikirto markaad la kulanto dhakhtarkaaga si aad ugala hadasho faa'iidooyinka iyo khatarta waxyeellada qaliinka iyo daaweyntaada. Waxaad markaas u baahan doontaa inaad saxiixdo foom si aad u sheegto inaad oggolaatay in laguu sameeyo qalliinka ama daaweynta

Waa maxay suuxdinta laga qaato xididka?

Suuxdinta xididka laga qaato waa marka dawada dejinta lagu duro dhiigaaga iyadoo la isticmaalayo tuubo yar oo balaastiig ah (sidoo kale loo yaqaan kaanool) sida caadiga ah la geliyo xididka gacantaada ama cumaacumtaada.

Waxaa loo tababbaray in ay ku siiyaan xaddiga rasmiga ah ee suuxdinta iyo maareeynta wixii dhib ka yimaado. Dhakhtarkaaga suuxdinta ayaa kula joogi doona inta lagu jiro daawayntaada wuxuuna la socon doonaa neefsashadaada iyo heerarka ogsajiinta.

Dawayntee baa la qaban karaa marka xididka la iska suuxiyo?

Daawooyin yar yar oo badan iyo baaritaanno ayaa lagu samayn karaa suuxdin xididka ah, inta badan iyada oo la raaciyo suuxdin maxalli ah. Tusaalooyinka waxa ka mid ah:

- Baaritaanka laga qaado maqaarka ama naasaha
- Kabidda yar ee lafaha jabay
- Qalliimada yaryar ee maqaarkaa, gacanta ama lugta
- waxaqabadyada lagu caawiiyo ogaanshaha dhibka caloosha (baaritaan kombuyuutareedka jirka), sambabka (baaritaan kombuyuutareedka sanbabka), mindhicirraha waaweyn (baaritaan kombuyuutareedka mindhicirrada waaweyn) ama kaadiheysta (baaritaan kombuyuutareedka kaadiheysta)
- ka saaridda ilig ama dawaynta ilkaha
- qalliinada indhaha, sida caad fiiqidda.
- qalliinka qurxinta

Qaar ka mid ah daawaynta ballaaran ayaa sidoo kale lagu sameyn karaa dein iyo suuxdin gudaha ah.

Suuxdinta qalliinka ilkaha iyo rugaha la isku qurxiyo

Daaweynta suuxinta waxaa badanaa lagu sameeyaa isbitaal. Si kastaba ha ahaatee, suuxdinta daawaynta ilkuhu waxa kale oo lagu bixin karaa qalliinka ilkaha ama rugta daryeelka ilkaha ee takhasuska leh. Suuxdinta qalliinka qurxinta ayaa laga yaabaa in lagu sameeyo rugta caafimaadka. Heerarka daryeelkaaga badbaadada leh ayaa ah sidii hore. Dhhtarkaaga suuxdinta, dhakhtarka ilkaha ama dhakhtarkaaga qurxinta

ayaa kaala hadli doona noocyada suuxdinta ee ku habboon - waxaa jira noocyo kala duwan oo suuxdineed oo diyaar u ah daaweynta ilkaha ee dadka waaweyn iyo carruurta. Waa inay sharraxaan waxa dhici doona inta lagu jiro daawayntaada iyo wixii khatar ah. Waa muhiim inaad si taxadar leh u raacdo talo kasta iyo tilmaamaha ay ku siiyaan.

Waa maxay faa'iidooyinka ay leedahay haddi suuxdintu ay tahay ikhtiyaarka daaweyntaada?

- Suuxdintu si dhakhso ah ayey u shaqeysaa, xaddiga daawadana waa loo beddeli kara inta kugu filan.
- Waxay kuu ogolaanaysaa inaad nasato inta lagu jiro daaweyntaada. Waxaa laga yaabaa inaadan wax badan ka xasuusanin daawayntaada dabadeed.
- Qalliinada qaar, waxaa suurtagal ah in lagu siiyo dawada dejinta halkii laga siin lahaa suuxinta guud, taas oo caawin karta bukaanada qaba dhibaatooyinka caafimaadka qaarkood.
- Caadi ahaan waxay leedahay waxyeelooyin yar marka loo eego suuxdinta guud.
- Kasoo kabsashada waa ay ka dhaqsi badan tahay tan Suuxdinta guud, sidaa darteed hal saac kadib gurigaaga waad aadi kartaa hadii aad caadi kusoo noqoto.

Waa maxay waxyaabaha lagu beddelan karo Suuxdinta?

- **Suuxdinta guud:** waxaad si buuxda u miyir daboolmi doontaa ilaa inta lagu guda jiro mana yeelan doontid wax xasuus ah oo ku saabsan qalliinka.
- **Suuxdinta gudaha iyada oo aan wax suuxdin ah an lahayn:** si buuxda ayaad u soo noqon doontaa inta lagu guda jiro daawaynta, laakiin waxba ma dareemeysid. Shaashad ayaa la dhigi doonaa si ay kaaga ilaaliso inaad aragto qalliinka.

Yaa go'aaminaya in la i suuxinayo iyo in kale?

Waxaad kala hadli kartaa dhakhtarkaaga qalliinka ama kalkaalisada kala doorashada suuxdinta inta lagu guda jiro wakhtiga qiimaynta. Hadii aanan laguu sheegin, had iyo goor waad weydiin kartaa in aad heli karto.

Haddii aad halis sare ugu jirto xaaladaha caafimaad ee jiran, dhakhaatiirtaada ayaa kaala hadli doona fursadaha. Ka dib waxaad ku heshiin kartaan doorashada ugu fiican.

Maxaan samayn karaa si aan ugu diyaar garoobo habraaca suuxdinta dejinta ah?

- Haddii aad haysato dad aad kuu daryeelo, tusaale ahaan carruur ama dad kaa weyn, waxaad u baahan doontaa inaad qorsheysato in qof kale uu daryeelo iyaga ilaa maalinta ka dambaysa qaliinka.
- Qof weyn oo karti leh ayaad u baahan doontaa inuu guriga kuugu geeyo baabuur ama taksi sida habboon - isticmaalka gaadiidka dadweynaha laguma talinaayo suuxdinta ka dib. Maadaama saameynta suuxdinta ay sii jireyso 24 saac, waa in ay kula joogaan habeenkaas si ay kuu ilaaliyaan.
- Daawooyinkaaga oo dhan u qaado isbitaalka, oo ay ku jiraan daawada neefsashada iyo dawooyin kasta oo aad si joogto ah u qaadato.

- Haddii aad qabtid jirro ama hargab, ama aad uur leedahay, fadlan la xiriir isbitaalkaaga ama rugtaada caafimaadka, sababtoo ah waxaa laga yaabaa inaysan habooneyn in suuxdin laguugu sameeyo. Daweyntaada waxaa laga yaabaa in dib loo dhigo.
- U sheeg dhakhtarkaaga maalinta qaliinka hadii aad naas nuujineyso.
- Iska saar dhamaan waxyaabaha la isku qurxiyo - oo ay ku jirto cidiyada la gashto iyo dahabka - Kahor inta aadan iman isbitaalka. Waad xirnaan kartaa faraantigs arooska.
- Soo qaado dhar dabacsan, sida xirashada cambuurka ama jaakatinka, si ad raaxo diirramaad u hesho. Soo gasho kabo siman oo aad si fudud u gashan karto.

Ma cuni karaa wax ama cabi karaa inta aanan dawaynta gaadanin?

Xaruntaada caafimaadka ama isbitaalkaaga ayaa kuu sheegaya macluumaadka joojinta cuntada iyo cabitaanka.

Suuxdin dhexdhexaad ah iyo midda qotodheer, waa inaad joojisaa cunista lix saacadood ka hor daaweyntaada, laakiin waxaad cabbi kartaa xaddi caadi ah oo 'dareere ah' ilaa laba saacadood ka hor daaweyntaada. Dareerrada saafiga ah waxaa ka mid ah biyo, casiir la qasi jiray (qaar la'aan) iyo shaaha madow ama kafeega.

Isku day inaadan joojiso cunida ama cabbitaanka wax ka badan tan.

Suuxdinta ugu yar,in aad soonto looma baahna, laakiin waa muhiim inaad ka hubsato tilmaamaha saxda ah ee isbitaalkaaga.

Haddii aad qabto sonkorow, waa inaad weydiisataa tilmaamo gaar ah oo ku saabsan goorta aad qaadanayso dawadaada sonkorowga iyo goorta aad joojiso cunista cuntada.

Maxaa dhici doona maalinta daawayntayda?

Caadiyan waxaad xiran doontaa cambuur. Markaad qolka qalliinka gasho, suuxiyaha wuxuu kugu xiri doonaa qalabka la socoshada xaaladda caafimaad ee jirkaaga. Qalabka la isticmaalo waxaa badanaa ka mid noqon doona:

- Qalabka cadaadiska dhiigga lagu cabbiro ayaa gacantaada lagugu xiri doono
- Qalab kale oo lagu dhajinaayo xabadkaaga si loo diiiwaan geliyo dhaqdhaqaaqa wadnahaaga
- Waxaa fartaada lagu xiri doonaa qalab si loo cabbiro heerka oksijiinkaaga
- tuubo caag ah oo cabireysa tirada kaarbon-laba-oksaydh ee aad neefsato. Tani waxay badanaa ku xitan tahay maaskarada oksijiinta ah.

Qaabkee aya loo siiyaa suuxdinta xididka?

- Suuxinta waxaa laga siiya faleebo (kaanool) kaas oo la geliyo xididka gacantaada ama cumaacuntaada. Daawooyin badan oo dejin ah ayaa lagu siin karaa haddii aad u baahato inta hawsha lagu jiro. Suuxdinta qotoda dheer, waxaa sida caadiga ah lagu siin doonaa daawo joogto ah xididka aya lagaa siinaya.
- Had iyo goor waxaa lagu siin doonaa oksijiin si aad uga neefsato tubo ku jirta sankaaga, ama maaskarada wajiga.

Suuxdinta sidee ayuu dareenkeeda yahay?

Tan wey ku kala duwanan yihiin dadka, ayadoo ay ku xiran tahay xadka daawada ay ku siiyeen. Inta lagu guda jiro suuxdinta waad hurdi doontaa, laakiin marka suuxdinta ay fududahay waxaad dareemeysaa dhaqdhaaq la'aan.

Markaan weydiinnay bukaannada qaar waxay dareemeen, jawaabaha qaar waxay ahaayeen:

'*Waxaan dareemay in aan meel ku maqanahay oo aana riyoonayo*'.

'Waxaan u maleynayey in aan soo jeedo inta aan ku jiray balse mararka qaar waan baxayay waxaan arkay hal saac ka dib'.

Waxaan dareemay dhaq-dhaaq la'aan iyo farxad.'

'*Waxay ahayd wax aan caadi ahayn - Waan ka dhex baxsanaa waxa agteyda ka dhacayay.*'

Waxaan aadeynaa guriga qalliinka ka dib

- Hadii aad qaadatay suuxinta fudud ama midda dhex-dhexaadka ah, waxaad caadi ahaan aadi kartaa guriga saacad gudaheed daaweyntaada.
- Haddii aad qaadatay suuxdin qoto dheer, soo kabashadaadu waxay badanaa qaadan doontaa laba saacadood ama ka badan. Markaad guriga aadi karto waxay ku xiran tahay inta ay kugu qaadanayso inaad ka soo kabsato daawada laftimeeda.
- Sidii aan hore u soo sheegnay, qof weyn oo karti leh ayaa u baahan doona inuu guriga kuugu geeyo baabuur ama taksi - oo aan ahayn gaadiidka dadweynaha - oo uu kula joogo habeen. Haddii aadan diyaarsan in qof kula joogo daawaynta ka dib, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad isbitaalka ku jirto habeen, ama daaweyntaada waxaa laga yaabaa inaad u baahato in dib loo dhigo.
- Suuxdintu waxay kaa dhigi kartaa mid aan cagahiisa ku qummanayn. Fadlan is ilaali marka aad jaranjar fuuleyso qofna kaxeyso hadii aad lacala dareento in aad istaagnaan weyso.
- Go'aan qaadashadaada waxaa laga yaabaa in ay daawada saamesyo mudo 24 saac kadib dawayntaada, sidaas awadeed go'aano muhim ah ha qaadan xilligaas. Waa inaad ka fogaataa inaad sidoo kale ku faafiso warbaahinta bulshada/golayaasha dadweynaha.
- Waa inaadan ku soo laaban shaqada, daryeelin dadka kugu tiirsan, kaxayn gaari, karinta ama ku shaqayn mishiin muddo 24 saacadood, sababtoo ah waxay qaadan kartaa muddadan dheer in daawadu ka baxdo jirkaaga.
- Waa in aadan qaadan wax khamri ah ama kaniiniga hurdada muddo 24 sac kadib marka lagu daweeyo.
- Dhakhtarkaaga wuxuu ku siin doonaa talooyin qoran oo ku saabsan daawayntaada guriga kadib marka lagu daweeyo.
- Isbitaalka wuxuu ku siin doonaa taleefoon lambar oo aad kala soo xiriirto hadii aad dareento in aad fiicnayn inta aad guriga joogto.
- Haddii qalliinka ka dib aad ka walaacsan tahay, aad dareento xanuun, ama aadan heli karin lambarka xiriirka isbitaalka, waxaad wici kartaa GP-gaaga, wac 111 ama aadi kartaa xarunta gargaarka degdegga ee shilalka ee deegaankaaga iyo waaxda degdega ah oo leh qof weyn oo karti leh haddii loo baahdo.

Dhibaatooyinka ka imaan karo daawada, waxyaabaha ka dhalan kara iyo halista.

Suuxdinta casriga ah, dhibaatooyinka halista ah waa wax aan ku badneyn. Halista gebi ahaanba meesha lagama saari karo, laakiin daawooyinka casriga ah, qalabka iyo tababarada waxay suuxdinta ka dhigeen mid aamin ah sanadahaan dambe.

Dareen-celinta ayaa aad u taxaddar leh si ay uga fogaadaan dhammaan khataraha la soo sheegay. Waxay awoodi doonaan inay ku siiyaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mid ka mid ah khatarahaas iyo waxay sameeyaan si ay uga fogaadaan.

Dadku way ku kala duwan yihiin sida ay u tarjumaan erayada iyo tirooyinka. Miisaanka hoose ayaa la bixiyaa si uu u caawiyo.

1 10kiiba	1 100kiiba	1 1000kiiba	1 10,000	1 100,000
Hal qof qoyskiinna	Hal qof Waddada	Hal qof xaafadda	Hal qof oo ku sugan magaalo yar	Hal qof oo ku sugan magaalo weyn

Waxaad kaloo ka heli kartaa macluumaad dheeri ah bogagga macluumaadka bukaanka ee koleejka ku leedahay dagalkeeda: www.rcoa.ac.uk/patientinfo

Khatarta inta lagu jiro suuxdinta

- Heerka neefsashadaada waxaa laga yaabaa in ay hoos uu dhacdo. Tani way badan tahay marka suuxdinta meel dheer la isticmaalo, laakiin waa halis mar walba oo la isticmaalo suuxdinta. Suuxiyaha wuxuu aqoon u leeyahay in uu kula socdo wuuna ku caawin karaa hadii loo baahdo.
- Aad bay u badan tahay in cadaadiska dhiiggaagu uu hoos u dhaco qadar yar, laakiin suuxiyahaaga ayaa u tababbaran daawaynta tan sidoo kale.
- Aad bay badan tahay in nabar yar kaaga sameysmo meesha kaanoolkaaga lagaga xiray.
- Dareen jirro ama matag waa wax aan badnayn.
- Waxaa jirta khatar dhif ah oo ah in waxa caloosha ku jira ay galaan sanbabadaada. Waa muhiim inaad raacdo tilmaamaha cunista iyo cabbitaanka si aad khatartaan u yarayso.
- Xasaasiyad kasta oo ka timaada daawooyinka suuxdinta waa dhif.

Khatarta ka dib suuxdintaada

- Waa wax caadi ah in aad dareento lulmo oo aad cagahaaga ku istaagi wayso. Waxaa laga yaabaa inaad halis sare ugu jirto inaad dhacdo, gaar ahaan haddii aad tahay qof da' ah
- Waa caadi in suuxdintu ay saamayso awooddaada xukunka iyo xusuustaada ilaa 24 saacadood.

Su'aalaha laga yaabo inaad jeceshahay inaad waydiiso arrimaha ku saabsan suuxdintaada

1 Yaa suuxdinta i siin doona?
2 Waa maxay nooca suuxdinta iigu fiican aniga iyo habka aan u qaadanaayo?
3 Ma leedahay khataro gaar ah?
4 Goormeen joojinayaa cunida iyo cabida ka hor inta aan la i suuxin?
5 Goormeen is diyaariyaa si la ii soo qaado?

Ilaha dheeraadka ah

- Daryeelidda qof lagu sameeyay suuxdin guud ama dejin (www.rcoa.ac.uk/patientinfo/sedation).
- Akademiyada koleejyada caafimaad ee boqortooyada. *Dhaqanka Suuxdinta Nabdoon ee Nidaamyada Daryeelka Caafimaadka: Cusub. AoMRC*, 2021 (https://bit.ly/3wEoHGy).
- Akademiyada koleejyada caafimaad ee boqortooyada. *Dhaqanka Suuxdinta Nabdoon ee Nidaamyada Daryeelka Caafimaadka: Heerarka iyo Hanuuninta. AoMRC,* 2013 (http://bit.ly/301ndq8).
- Guddiga La-talinta Isku-dhafka ah ee Suuxdinta ee Daawaynta Ilkaha. *Heerarka suuxdinta miyirka ee bixinta adeegyada caafimaadka ilkaha. RCS*, 2020 (https://bit.ly/3vz0YWP).
- Warqadaha la xiriira halisaha qaar ee suuxdinta ama hab-qaadashada suuxdinta waxaad kaloo ka heli kartaa bogga koleejka: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/risks/risk-leaflets

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in macluumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Uma fileynno macluumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama waxkasta oo aad kuugu muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto kooxda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yarahaan sidii hagge ahaan. Buug-yarahaan keligiis looma tixgalin doono talo ahaan. looma isticmaali karo ganacsi ahaan ujeedo. Qiimayn buuxda, fadlan halkaan riix (www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali).

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (Turjubaanada bilaa xuduudaah') bulshada turjubaanka. tTayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadaha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta macluumaadka qaar.

Noo sheeg waxay kula tahay

Waxaan soo dhaweyneynaa talooyin ka si kor loogu qaado tayada buugyarahan.

Haddii aad haysid wax faalo ah oo aad jeceshahay Inaad nala waadaagto fadlan ku soo hagaaji: patientinformation@rcoa.ac.uk

Kulliyadda Boqortooyada ee Dhakhaatiirta Suuxdinta
Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG
020 7092 1500

www.rcoa.ac.uk

Daabacaadda Labaad, Juun 2021

Buugyarahan waxaa dib u eegis lagu sameyn doonaa saddex sano gudahood, laga bilaabo taariikhda daabacaadda.

© 2021 Kulliyadda Royal ee Dhakhaatiirta Suuxdinta.

Buugyarahan waa la badin karaa ayadoo ujeeddadu tahay kaliya in bukaannada loo soo saaro macluumaad anfacaaya. Fadlan dhowr xuquuqda oo xus halka aad ka soo xigatay. Haddii aad dooneysid in aad ku isticmaasho qayb ka mid ah buugyarahan daabacaad kale, waa in aad ku muujisaa qaybta horudhaca astaamaha, sumadaha iyo sawirrada aad ka reebtay. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan nagala soo xiriir.